

XAQA AY ARDAYDA LAGA TIRADA BADAN YAHAY U LEEYIHIIN SI KHAAS-AH U BARISTA LUUQADDA

Xuquuqda ay ardayda laga tirada badan yahay u leeyihiin in luuqadda si khaas ah loo baraa waxay ku taallaa sharciga waxbarashada qodobadiisa kala ah:

Dugsiyada hoose/dhexe qodobka § 2-8, dugsiyada sare qodobka § 3-12, dugsiyada sida gaarka ah loo leeyahay qodobka § 3-5.

Waxaad xaq u leedahay in si khaas ah noorwiiigiga lagu baro haddii:

- Aanay luuqaddaada hooyo noorwiiji ama saami ahayn
- Aanad waxbarashada caadiga ah la socon karayn luuqaddaada noorwiiigiga ah oo liidata darteed.

Tani waa mid laga gudbaayo oo ku eg inta aad ka baranaysa noorwiiji fiican oo aad kula socon karto waxbarashada caadiga ah. Habkan waxbarasho waa waxa ugu horreeya ee loo qabto ardayda aan waxbarashada noorwiiigiga ku baxaysa la socon karin.

Iskuuka ayaa ka shaqaynaya oo ogaanaya heerka luuqaddaada noorwiiigiga si waxbarashada kugu habboon laguugu diyaariyo.

Ka-baaraan-degga heerka luuqadda ee ardayga waxaa la sameeyaa:

- markuu ardaygu bilaabay dugsiyada sare
- sannad-dugsiyeedka dhexdiisa si loo eego in ardaygu bartay noorwiiigan fiican si markaa looga joojiyo luuqad-barista habka khaaska ah

Haddii ay lagama maarmaan noqoto waxaad xaq u yeelan kartaa in lagu baro luuqaddaada hooyo, ama in maaddooyinka lagu baro luuqaddaada hooyo iyo noorwiiigiga oo wada socda ama in labadaba laysu kaa raaciyo. Habkan waxaa ugu horrayn loogu talagalay ardayda waddanka ku cusub iyo kuwa heerka noorwiiji-goodu aad u liito ee aan waxbarashada noorwiiigiga ku baxaysa waxba kala socon karin.

Barista khaaska ah ee noorwiiigiga iyo in maaddooyinka lagu barto noorwiiigiga iyo luuqadda hooyo oo wada socda waxaa lagu bartaa iskuulka uu ardaygu dhigto. Luuqadda hooyo-se waxaa lagu baran karaa iskuul kale. Haddii la waayo macaallimiin aqoon u leh barista luuqadda hooyo iyo maaddooyin ku dhigista 2da luuqadood (noorwiiigiga iyo luuqadda hooyo) oo wada socda, waxaa markaa waxbarashada laguugu habaynayaa sida ugu suurta-galka ah ee aad wax u baran karto.

Haddii aad xaq u yeelato waxbarista habka khaaska ah waxaad iyana markaa xaq u yeelanaysaa in laba sano oo dheeraad ah laguugu daro muddada dugsiyada sare haddaad u baahato.

Haddii marka lagaa soo baaraan-dego ay noqoto in aad u baahan tahay hab-waxbarista luuqadda ee khaaska ah waxaa lagu soo dirayaa warqad laguugu soo ban-dhigayo habkan waxbarasho, waana in aad ka soo jawaabtaa in aad rabto iyo in kale.

Maamulaha ayaa go'aan ka soo saaraya in aad xaq u leedahay barista khaaska ah noorwiiigiga, barashada luuqadda hooyo iyo/ama in maaddooyinka laguugu dhigo 2da luuqadood (noorwiiigiga iyo luuqadda-hooyo) oo wada socda.

Somali

Waxaa shardi ah in habkan khaaska ah ee barista noorwiiijiga la joojin doono markaad afka si fiican u barato.

Sida uu dhigayo sharciga carruurta (barneloven) qodobka § 32 ardaydu marka ay buuxiso 15 sano iyagaa go'aan ka gaadhi kara habka waxbarsho ee ay rabaan sida habka luuqad barista ee khaaska ah.

Wixii su'aalo ah ee ku saabsan habkan waxbarasho waxaa lagala xiriiirayaa iskuulka ay khusayso.

Haddii aanad arday ahaan ama waalid ahaan ku qanacsanayn go'aanka hab-waxbarasho ee iskuulka dacwo ayaad ka qaadan kartaa.

Dacwo ka qaadashadu waa in ay qoraal ahaataa lana soo saxeexaa. Haddii aad ka yar tahay 18 sano waxaa soo saxeexaya waalidka. Dacwadda waxaa loo dirayaa maamulaha dugsiga/iskuulka. Dacwaddu waa in ay si kooban u tustaa waxa aad ka dacwoonayso iyo waxa aad qabto in go'aanka laga beddelo. Meesha dacwada ugu dambayn go'aan ka soo gaadhaa waa xafiiska gobolka ee Oslo iyo Akershus.

Oslo 07.08.13

Translated by the city of Oslo, Welfare department,

The interpreting and Translating Service in Oslo.

This office is not responsible for ascertaining, whether source-language documents are genuine.

Vesna Pacariz
Head of section